

Mas'uuliyadda Lacagta ee Bukaanka

Macluumaad Muhiim ah ee ku Saabsan:

- Waxa aad sameyn kareysid haddii Aadan Caymis Caafimaad Qabin
- Qorshaha Lacag Bixinta
- Barnaamijka Deynta Kharashka Cusbitaalka
- Gargaarka Caafimaadka

Inkastoo West Penn Allegheny Health System (WPAHS) (Qaabka Caafimaadka ee Penn Allegheny) ay filayso in bukaanku iska bixiyaan biilasha caafimaadka, waxaannu qabnaa noocyo kala duwan ee qorshooyinka lacag bixinta. Haddii aadan caymis qabin ama aad ku jidhid caymis kaa doonaya in aad bixisid lacag badan ka hor inta uusan caymisku kharashku bixinin, fadlan feejignaan u yeelo qaababka lacag bixineed ee soo socda.

Barnaamijka Gargaarka Xisaabta West Penn Allegheny Health System

- **WPAHS waxaa ay aqbalaan lacag caddaan ah, jeegga shakhsiyeed, iyo jeegagga wareega.**
- Biilasha waxaa sidoo kale la isaga bixin karaa **kaararka amaahda**. Dhammaan cusbitaallada WPAHS waxaa ay aqbalaan kaararka amaahda noocoodu yahay Visa, Mastercard, Discover iyo American Express. Isticmaalka kaararka amaahda waxaa ay kuu furaysaa fursad aad uga faa'iidaysan kartid munaafacaadka ay bixiso shirkadda ee kaarka amaahda.
- **Biil bixinta internetka** ayaad ka helaysaa dhowr cusbitaal ee ka tirsan WPAHS. Fadlan waxaad wacdaa waaxda adeegga macaamilka ee cusbitaalkaaga si aad macluumaad uga heshid lacag bixinta noocani ah.
- **Qorshooyinka Lacag Bixineed** ayaa laga helayaa bukaannada ay biilashoodu ka sarreyso \$75. Si aad u sameysatid qorshe lacag bixineed, fadlan la soo xiriir lambarka adeegga macaamilka ku yaalla xagga dambee ee qoraalkani. Lacagta haraaga ah ee ka yar \$75 waa in la bixiyaa kaddib marka biilka la helo.
- **Hospital Expense Loan Program (HELP) (Barnaamijka Amaahda Kharashka Cusbitaalka)** waa amaah ay helayaan bukaannada u qalma oo ay biilashoodu u dhaxeeyso \$200 illaa \$10,000. HELP waxaa ay bixiyaan amaah shakhsiyeed, ee uu dulsaar fuulayo taasoo aad isaga bixin kartid biilasha cusbitaalka ee aan u gudbin hay'adda lacag soo celinta. Amaahda HELP waxaa la iska bixin karaa hal illaa shan sannadood iyadoo dulsaar ku yahay 9.5%.
- **Barnaamijyada Gargaarka Caafimaadka** oo ay bixiyaan dawladaha gobollada waxaa uu kaa saacidi karayaa bixitaanka biilashaada iyo in aad u qalantid caymiska caafimaadka ama caymiska dawada dhakhaatiirtu qoraan oo kaa saacidaya daryeelkaaga caafimaad ee mustaqbalka. Barnaamijka Caymiska Caafimaadka Dadka Weyn ee Pennsylvania's (Pennsylvania's adult Basic insurance program) waxaa uu bixiyaa gargaar oo ay ku jiraan daryeelka ka-hortagga, adeegyada degdegga, caymiska shilalka, gargaarka Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta (WIC), daryeelka hooyada, iyo daryeelka caafimaadka ee degganayaasha da'doodu u dhaxeeyso 19 illaa 64 ee aan qabin caymis caafimaad iyadoo dakhliga qoyskoodu uusan ka badneyn xadka loogu talagalay. Gobollada kale waxaa ay bixiyaan barnaamijyo la nooc ah ee sidoo kale ku saacidi karaya.
- **WPAHS Account Assistance Program (Barnaamijka Gargaarka Xisaabta WPAHS)** waxaa uu lacag dhimis u sameeyaa bukaannada aan caymiska ku jirin kuwaasoo dakhligoodu yahay xadka ay tilmaameen iyo soo Gudbinta Codsiga Gargaarka Xisaabta.

Macluumaad dheeraad ah ee la xiriira shuruudaha iyo noocyada lacag bixineed ee WPAHS ayaad ka helaysaa boggeenna internetka: [http://www.wpahs.org/patients/patients/insurance\\_coverage.html](http://www.wpahs.org/patients/patients/insurance_coverage.html) ama adigoo soo wacaya lambarka taleefanka adeegga macaamilka ee ku yaal bogga dambe ee qoraalkani.

Si aad u heshid macluumaadka barnaamijyada kaa saacidi karaya biilasha caafimaadka, fadlan la soo xiriir hay'adaha soo socda: